

لا إله إلا الله



القيادة العسكرية

ARMED FORCES COMMAND  
TALISKA CIIDANKA

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ  
لِلنَّشْرِ الْعَاجِلِ

FOR IMMEDIATE RELEASE



حركة الشباب المجاهدين

HARAKAT AL-SHABAAB AL MUJAHIDEEN  
XARAKADA MUJAAHIDIINTA AL-SHABAAB

## “Mujaahidiinta oo la wareegay degmada Tawfiiq”

26 Ramadaan 1446 H (26 Maarso 2025)

Ciidamada Mujaahidiinta ayaa saakay dagaal kula wareegay degmada Tawfiiq ee Wilaayada Islaamiga ah ee Shabeellada dhexe. Dagaalka ayaa lagu qaaday maleeshiyo murtadiin ashahaado la dirir ah oo dhawaan lagu soo jebiyay degmooyin iyo deegaanno ay isbuucyadii la soo dhaafay Mujaahidiinta dagaallo kula wareegeen. Maleeshiyadii murtadiinta ahaa ee ka cararay degmada Tawfiiq ayaa u firxaday dhanka deegaanka Geelgub oo 10km u jira deegaanka Xaaji Cali, halkaas oo ay Mujaahidiinta uga dabatageen firxadkii murtadiinta, kana sii cayriyeen.

Degmada Tawfiiq, oo sidoo kale loo aqoon jiray Masaajid Cali Guduud, ayaa ah degmo istiraatiiji ah oo ay cadawga muratdiinta ah ee xoogga ku qabsaday ka abaabuli jireen hagar daamooyinka ashahaado la dirirnimada ee ka dhanka ah dadka Muslimiinta ah ee ku dhaqan bariga Wilaayada Islaamiga ah ee Shabeellada dhexe.

Tirada hordhaca ah ee aan xaqiijinay in cadawga looga dilay dagaalka maanta waa 11 askari oo dhimasho ah iyo dhaawac intaas ka badan. Waxaa sidoo kale cadawga laga qabtay 5 murtad oo iyagoo maxaabiis ah ku jira gacanta ciidanka Difaaca Shareecada Islaamka. Mujaahidiinta ayaa dhanka kale ghaniisaystay hub iyo saanad ay cadawgu uga carareen goobihii dagaalka ee degmada Tawfiiq iyo deegaanka Geelgub.

Taliska ciidamada Mujaahidiinta wuxuu bogaadinayaa hawgallada ay geesiyada Tawxiidku ka wadaan Wilaayaatka Hiiraan, Shabeellada dhexe iyo Shabeellada hoose kuwaas oo lagu xoreeyay degmooyin iyo deegaanno ay cadawgu xoog ku haysteen, dibna looga soo celiyay xukunka shareecada Islaamka.



﴿ وَلِلَّهِ الْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴾

“But honour belongs to Allah and His Messenger, and to the Believers; but the Hypocrites know not”